Victim Support
Helping people cope with crime

Thank you for using our service

Waad ku mahadsan tahay isitcimaalka adeeggeenna

Waad ku mahadsan tahay isitcimaalka adeeggeenna

Waxaan rajeyneynaa in la xiriiriddaada Victim Support (Taageerada Dhibbanuhu) ay ahayd mid waxtar leh.

Waan ognahay in dadku ay habab kala duwan oo badan jawaab uga bixiyaan denbiga, iyo dadku ay leeyihiin baahiyo kala duwan iyo habab lagaga gudbayo arrimaha dhacay. Taageerada Dhibbanuhu waxay halkaa u joogtaa inay geeddi socodka kaa caawiso.

Sidoo kale waa run in dadka intooda badan ay gaari doonaan waqti ay dareemaan inay tahay inay horey u dhaqaaqaan aysanna dib danbe ugu baahan inay si joogto ah ula xiriiraan Taageerada Dhibbanaha.

Diyaar ayaan weli ku nahay haddii aad noo baahatid

Waa muhiim inaad ogaatid inaad awooddid inaad mar walba la xiriiri kartid Taageerada Dhibbanaha mar kale haddii aad dooneysid, xataa waqti ka dib mustaqbalka. Diyaar ayaannu ahaan doonnaa haddii adiga, ama qof aad taqaaannid, aad annaga mar kale noo baahataan. Ma jiraan wax waqti xaddidan ah oo aaddan ku isticmaalka adeeggeenna.

Waqtiyada qaarkood sanadguuro ama horumaryo ee arrin macnaheedu waxay tahay in dadku ay u arkaan mid waxtar leh in dib loola xiriiro Taageerada Dhibbanaha. Laakiin uma baahnid sabab gaar ah oo loogu talogalay inaad doonto inaad mar kale nala hadasho.

Faah faahinta la xiriiridda Qorshaha Taageerada Dhibbanaha ee deegaanka waxaa lagu daabacay bogga u dambeeya ee warqaddaan qoran.

Haddii aad guurtid, ama sabab kastoo ay noqoto haddii aadan hubin inaad xiriir la sameyneysid adeegga deegaankaaga, waxaad wici kartaa Victim Supportline (khadka Taageerada Dhibbanaha). Khadka Taageerada Dhibbanahu waa khadkeenna caawinta telefoonka gudaha ee qaranka. Shaqaale la tababaray iyo mutadawiciin ayaa dadka uu denbigu saameeyey ugu deeqaya taageero iyo war taasoo leh kalsooni buuxda. Waxay sidoo kale kula xiriirin karaan Qorshaha Taageerada Dhibbanaha deegaankaaga ama Witness Service (Adeegga Marqaatiga).

Victim Support
Helping people cope with crime

Victim Supportline
(Khadka Taageerada Dhibbanaha)
0845 30 30 900

Aragtiyadaada ku aaddan adeeggeenna

Taageerada Dhibbanahu waxay mar walba raadineysaa habab ay kor ugu qaaddo shaqadeeda. Si aad nooga caawisid tan waxaan si aad u jeclaan lahayn inaan maqalno aragtiyadaada ku aaddan adeeggeenna iyo wixii aad kaa soo martay isticmaalidda Taageerada Dhibbanaha.

Wixii war ah ee aad na siisid waxaa loo isticmaali doonaa si kor loogu qaado adeeggeenna ku wajahan dhibbaneyaasha denbiga isla markaana wixii gaar ku ahaan doonaa Taageerada Dhibbanaha.

Sidoo kale waxaan soo dhaweyneynaa faallo ka bixinta iyo soo jeedinnada ku saabsan adeeggeenna, Taageerada Dhibbanuhu waxay si dhab ah u qaadataa dacwooyinka. Fadlan la xiriir Qorshaha Taageerada Dhibbanaha ama Xafiiska Qaranka (eeg bogga u dambeeya) haddii aad u baahan tahay faah faahin dheeraad ah.

Arrimaha aad jeclaan lahayd inaad soo qaaddo

Iyo sidoo kale u adeegidda shakhsiyaadka, Taageerada Dhibbanuhu waxay sidoo kale ka shaqeysaa kor u qaadidda wacyiga dadweynaha ee saameynada denbiga isla markaana waxaan kor u qaadnaa xuquuqaha dhibbanaha.

Sanadaha la soo maray, waxaan guul ka gaarnay hagaajinno waaweyn ee habka Dhibbaneyaasha denbiga iyo marqaatiyada loola dhaqmo. Guusha waxaa lagu dhisay aqoonteenna baahiyada iyo khuseynada dhibbaneyaasha denbiga aan la soo shaqeynay.

Waxaan si aad ah u jeclaan lahayn inaan maqalno aragtiyadaada. Miyey jiraan wax arrimo ah oo ay kula tahay inaan wax ka ogaanno? Kuwaani waxay ku xiriirsanaan karaan wixii aad ka soo martay qaababka caddaaladda denbiyeed, laakiin waxay sidoo kale khuseyn karaan habka ururrada kale ama shakhsiyaadku ay uga jawaab bixiyeen.

Sideed gacan uga geysan kartaa

Taageerada Dhibbanuhu waa hay'ad samafal oo qaran oo loogu talogalay dhibbaneyaasha denbiga. Waxaan nahay urur madax bannaan oo ku deeqa adeeg kalsooni leh oo lacag la'aan ah,

Victim Support
Helping people cope with crime

iyadoon loo eegeyn in denbiga la soo tebiyey iyo in kale. Waxaan ku tiirsannahay taageerada dadweynaha si aan u sii wadno adeeggeenna.
Waxaa jira habab badan oo kala duwan oo looga qayb geli karo shaqadeenna marka lagu daro:

- iyadoo la noqonayo mutadawac
- tabarrucaad la bixinayo
- la noqonayo qof taageera Taageerada Dhibbanaha
- gacan laga geysanayo daabacaadda shaqadeenna.

Tabarrucaad bixin

Haddii aad jeceshahay inaad nagu caawisid inaan wax badan u qabanno dhibbaneyaasha denbiga, waxaa laga yaabaa inaad ka fiirsatid inaad tabarrucaad bixisid ama haddiyad joogto ah, habka ugu wanagsan ee kuu cuntama. Waxaan sidoo kale ku siin karnaa warar ku saabsan sida aad Taageerada Dhibbanaha u dhaxalsiineysid lacag iyo hanti.

Warar dheeraad ah si aad u heshid, fadlan kala xiriir kooxda maaliyad raadinta joogta Xafiiska Qaranka (National Office), ama laanta Taageerada Dhibbanaha ee deegaankaaga ama Adeegga Marqaatiga.

Waqtigaaga oo aad bixisid

Haddii adiga, ama qof aad taqaannid, aad jeceshihiin inaad wax ka beddeshaan nolosha dadka uu denbigu saameeyey, waxaad ka fiirsan kartaan inaad noqotaan mutadawiciin Taageerada Dhibbanaha waqti mustaqbalka ah. Mutadawiciinta Taageerada Dhibbanuhu waxay ka kala yimaadaan dhammaan qaybaha mujtamaca iyo dhammaan nolosha qaybaheeda. Waxa isu keena waa xiiso ay u hayaan dadka iyo rabitaan inay caawiyaan kuwa uu denbigu saameeyey.

Qorshaha Taageerada Dhibbanaha ee deegaankaaga ama Adeegga Marqaatigu waxay awoodi doonaan inay kaala wada hadlaan arrintaan, marka lagu daro wixii arrimo oo ku saabsan wixii aad ka soo martay noqosho dhibbane denbi iyo sida taasi ay xiriir ula leedahay mutadawac noqoshada.

Waxaa sidoo kale jira fursado gacan looga geysanayo habab kale, tusaale ahaan maaliyad dalbid, maamul xafiis, ama turjumid ama bixinta taageero xagga IT-da (Kumbuyuutarka) ah.

La xiriiridda Taageerada Dhibbanaha.
Qorshaha Taageerada Dhibbanaha deegaankaaga

Victim Support
Helping people cope with crime

Madaxa HRH ee Princess Royal

Victim Support National Office, Cranmer House,
39 Brixton Road, London, SW9 6DZ
Telefoon: 020 7735 9166 Faakis: 020 7582 5712
Shabakad: www.victimsupport.org

Diiwaan gelinta Hay'adda: 298028 Lambarka Shirkadda: 2158780
Waxaa laga diiwaan geliyey Dammaanadda Xaddidan ee Igland
Xafiiska Diiwaan geliyey sida kore.